

# U-diyaargarowga Isbeddellada khuseeya Faa'iidooyinka

## Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) iyo Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS). Su'aalaha Badanaa La Isweydiyo

Su'aalo iyo jawaabo ku saabsan isbeddellada soo socda ee khuseeya:

- Qorshaha Caafimaadka Oregon (Oregon Health Plan, OHP);
- Barnaamijyada Kaydsashada ee Medicare (MSP);
- Adeegyada iyo taageerada loogu talagalay dadka qaba naafanimada iyo dadka waayeelka ah;
- Barnaamijka Kaalmada Kaabayaasha Nafaqada (SNAP); iyo
- faa'iidooyinka kale.

Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxay u adeegaan dad badan oo isku mid ah, waxayna labada wakaaladood si wada jir ah uga shaqaynayaan inay u diyaargarobaan isbeddellada soo socda ee khuseeya OHP, adeegyada iyo taageerada loogu talagalay dadka qaba naafanimada iyo dadka waayeelka ah, iyo faa'iidooyinka kale sida Barnaamijyada Kaydsashada ee Medicare. Kuwani waxaa sidoo kale kujira isbeddellada khuseeya barnaamijka SNAP.

### 1. Sidee ayay isbeddelada soo socda ee khuseeya faa'iidooyinka u saameeynayaan shakhsiyaadka iyo qoysaska?

Isbeddellada qofka ama qoysku la kulmi karo waxay ku xidhan yihiin barnaamijyada ay ka qaybqaataan. Barnaamij kasta wuxuu leeyahay shuruudo u-qalmitaan oo gooni u ah. Qof kasta ama qoys kasta waxaa uu leeyahay duruufo u gaar ah oo wax ka bedeli kara u-qalmitaankooda.

ODHS iyo OHA waxay leeyihiin saddex hadaf/yool markay bilowdaan isbeddelada faa'iidooyinka:



- Xaqiijinta in dhammaan dadka iyo qoysaska ay helaan dhammaan faa'iidooyinka ay u qalmaan kala go' la'aan. Dad badan ayaa weli u qalmi faa'iidooyinka ay hadda helayaan.
- In dadka laga dhimi doono ama seegi doono faa'iidooyinka la siiyo jiho cad laguna xiro khayraadyo kale markay suurtagal tahay.
- In dadka caawinaya dadka faa'iidooyinka qaata la siiyo macluumaad waadax ah oo ku saabsan sida ay u taageeri karaan dadka wajahayo isbeddellada faa'iidooyinka.

Shakhsiyaadka iyo qoysaska ayaa la ogaysiin doonaa haddii faa'iidooyinkoodu isbedelayaan waxaana lagu wargelin doonaa waxa ay samaynayaan si ay u sii haystaan faa'iidooyinkooda.

### **Haddii aad tahay xubin katirsan OHP:**

Intii lagu gudajiray Gurmada Caafimaadka Dadweynaha (PHE) ee COVID-19 ee federaalka, xubnaha OHP intooda badan waxay awoodeen inay sii haystaan OHP-gooda iyada oo aan loo eegin isbeddellada. Laga bilaabo 1-da Abriil, 2023, waxaan bilaabi doonaa dib u-eegista u-qalmitaanka dhammaan xubnaha OHP. Waxaan tani ugu yeernaa "Cusbooneysiinta OHP-gaaga."

Si aad u sii haysato OHP-gaaga, fadlan noo soo jawaab haddii aanu ku waydiino macluumaad dheeri ah. Qof walba lama weydiin doono macluumaad dheeri ah. Waxaa laga yaabaa inaad weydo OHP-gaaga haddii aadan u qalmin, laakiin haddii aad leedahay Medicare, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto faa'iidooyinka MSP ee caawiya kharashyada Medicare. Haddii OHP-gaagu dhammaado, waxaad ogaysiis ku heli doontaa boostada ugu yaraan 60 maalmood ka hor inta aanu OHP-gaagu dhicin. [Akhriso wax dheeri ah oo ku saabsan dib u cusboonaysiinta OHP-gaaga.](#)

Fadlan ogsonow in waraaqo ogeysiis ah oo xubnaha ku dhiirigelinayo inay cusboonaysiiyaan macluumaadkooda xidhiidhka boostada loogu soo diray xubnaha OHP intii u dhaxaysay Oktoobar iyo Noofembar 2022.

- [Eeg muunadda warqadda OHP](#)

Haddii aadan warqad ku helin boostada, waxay ka dhigan tahay in aanan hayn macluumaadkaaga xiriirka ee ugu dambeeyay. Si aad u sii haysato OHP-gaaga, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad bixiso macluumaadkaaga aad haddeer isticmaasho. Haddii macluumaadkaaga xiriirka isbeddelay ama isbeddelayo, xaqiiji inaad wargeliso wakaalada. [Booqo boggan](#) ama eeg hoos si aad wax dheeri ah uga ogaato siyaabaha aad ku cusboonaysiin karto macluumaadkaaga xidhiidhka.



## **Haddii aad gaartay 65 jir intii uu socday cudurka faafaha, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad ka guurto OHP una guurto Medicare:**

Haddii isbeddelkani adiga ku khuseeyo, waxaad isbeddelo ku arki doontaa caymiska iyo kharashyada jeeb-ka-bixiska.

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad bixiso ganaax haddii aadan iska diiwaangelinin Medicare markii ugu horeysa ee aad u qalantay, oo ah markaad gaartay 65 jir, waxaana laga yaabaa inaad sugto muddo si aad u hesho caymiska. Xaqiijinta in aysan jirin wax kala go'a oo ku yimaada caymiska waxay dadka ka ilaalin doontaa ganaaxa ka dhalan kara kala go'an. Fadlan is-diiwaangeli isla marka aad u-qalanto.

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sida la iskaga diiwaangeliyo Medicare, guji [halkan](#).

Booqo barnaamijka [Kaalmada Faa'iidooyinka Caymiska Caafimaadka ee Waayeelka \(SHIBA\)](#) haddii aad qabtid su'aalo ama aad u baahan tahay caawimo la xidhiidha Medicare.

## **Haddii aad xubin ka tahay Barnaamijka Kaydsashada Medicare (MSP):**

Xubnaha Barnaamijka Kaydsashada Medicare ayaa sidoo kale lagu sameyn doonaa dib u-eegista u-qalmitaanka laga bilaabo 1-da Abriil. Fadlan noo soo jawaab markii aan kaa dalbano macluumaad dheeri ah. Haddii aadan soo jawaabin, faa'iidooyinkaaga ayaa laga yaabaa inay xirmaan, xitaa haddii aad weli u-qalanto.

- [Eeg muunadda warqadda MSP](#)

## **Haddii aad hesho adeegyada iyo taageerada loogu talagalay dadka qaba naafanimada iyo dadka waayeelka ah:**

Medicaid ayaa kharashka daryeelka muddada-dheer soconayo ka bixiya shakhsiyaadka u-qalma. Adeegyada iyo taageerada loogu talagalay dadka qaba naafanimada iyo dadka waayeelka ah waxa la bixiyaa iyadoo lagu salaynayo baahiyaha iyo dooqyada shakhsiga. Taageerada waxaa lagu bixin karaa guriga qofka ama goob daryeel.

- Qof kasta oo aanan hadda ka dib u-qalmin dhaqaalaha loogu talagalay dadka qaba naafanimada iyo dadka waayeelka ah wuxu lumin kara caymiska iyo sidoo kale lacagaha taageerooyinka kale ee uu qofku helo. Taageerooyinka kale waxaa ku jiri kara guriga haddii qofku ku nool yahay goob daryeel oo shatiyeysan. Waxaad heli doontaa ogeysiis gooni ah haddii mid ka mid ah



adeegyadan uu dhammaanayo. Ogeysiiskan waxa ku jiri doona tallaabooyinka xiga iyo khayraadyada.

- Ma jiro faa'iido u dhiganta, Barnaamijka Caafimaadka Aasaasiga ah ee gobolka, ama ilo kale oo lacag-bixin ah oo loo heli karo adeegyada iyo taageerada loogu talagalay dadka qaba naafanimada iyo dadka waayeelka ah.
- Dadka dhaqaale ahaan u qalma adeegyada iyo taageerada ayaa sii haysan doona caymiskooda caafimaad ilaa inta ay u qalmaan iyadoo lagu salaynayo baahiyadooda la qiimeeyay ee ku aadan adeegyada iyo taageerada loogu talagalay dadka qaba naafanimada iyo dadka waayeelka ah.

### **Haddii aad qaadato faa'iidooyinka cuntada ee SNAP:**

Qaatayaasha SNAP waxay sii heli doonaan faa'iidooyinka SNAP ee caadiga ah ee la bixiyo inta u dhaxaysa maalinta 1<sup>-aad</sup> iyo 9<sup>-aad</sup> ee bil kasta.

Intii lagu gudajiray Gurmada Caafimaadka Dadweynaha ee COVID-19 ee federaalka, dadku waxay heleen faa'iidooyinka cunto oo dheeri ah. Faa'iidooyinka soo socda ayaa dhammaan doona ama meesha looga saari doonaa si marxaladaysan:

- **Qaybinta Gurmada ah ee SNAP:** Dadku waxay heleen Qaybinta Gurmada ah ee SNAP bil kasta laga soo bilaabo Abriil 2020. Qaatayaasha SNAP waxay joojin doonaan helida Qaybinta Gurmada ah ee SNAP wixii ka dambeeya Febraayo 2023. Laga bilaabo 1-da Maarso, 2023, dadku waxay ku laaban doonaan helida qaddarkooda faa'iidooyinka SNAP ee caadiga ah ee billaha ah inta u dhaxaysa 1-da iyo 9-ka bil kasta. Dadku waxay [macluumaad dheeraad ah ka heli karaan onlayn](#).
- **EBT-da Cudurka Faafayo iyo PEBT-da Xagaaga:** Faa'iidooyinka cuntada waxaa si xilliyeysan loo siiyaa carruurta helitaankooda cunto ku filan oo tayo leh uu saameeyay COVID-19. Oregon waxay dheefaha PEBT ee Xagaaga ee loogu talagalay 2022 markii ugu dambeysay bixin doontaa bartamaha Maarso 2023. Dadku waxay macluumaad dheeri ah ka heli karaan onlayn iyagoo booqanayo [PEBT.Oregon.Gov](#).

Intii lagu gudajiray PHE-ga COVID-19, qaar ka mid ah xeerarka SNAP ayaa la beddelay. Xeerarkani ayaa mar kale isbeddeli doona marka PHE-ga COVID-19 uu dhammaado:

- **Shuruudaha Shaqada ee Dadka Waaweyn ee Jirkooda Awooda leeyahay ee aysan Cidan Ku-tiirsaneyn (ABAWD):** Shuruudaha shaqada waxay dib ugu bilaabmi doonaan qaatayaasha SNAP ee buuxiya shuruudaha heerka ABAWD laga bilaabo Luulyo 1, 2023. Meelaha qaar ee gobolka Oregon ee leh heerarka



shaqo la'aaneed ee ka sarreeya heerka qaranka ayaa laga dhaafi doonaa dib u bilaabista shuruudaha shaqada. Qaar kalena waxay isticmaali doonaan tiro xaddidan oo ah ka-dhaafitaano ikhtiyaari ah. Meelaha soo socda ayaa dib u bilaabi doona shuruudaha shaqada: Clackamas, Deschutes, Jackson, Lane, Linn, Marion, Multnomah iyo Washington.

- **Ka-dhaafitaanada ku-meelgaarka ah ee SNAP ee loogu talagalay ardayda tacliinta sare:** Laba ka-dhaafitaano oo ku-meelgaar ah ayaa u oggolaaday ardayda qaar in ay u qalmaan SNAP: lahaanshaha wax-ku-biirinta qoyska ee la filayo oo eber ah iyo u-qalmitaanka shaqada xiliga waxbarashada. Labadan ka-dhaafitaano ayaa waxay u dhammaan doonaan sida ku cad jadwalka soo socda:
  - Ka-dhaafitaanada ku-meelgaarka ah waxaa lagu dabaqi doonaa kiisaska cusub ilaa iyo 10-ka Juun, 2023.
  - Waxaa lagu dabaqi doonaa kiisaska cusboonaysiinta ah ilaa iyo dhammaadka Juun.
  - Kiisaska socda waxa ay ahaanayaan kuwo lagu daboolaya ka-dhaafitaanada ku-meelgaarka ah ilaa laga gaarayo waqtiga laga filaayo cusboonaysiinta.
  - Ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa inay eegaan siyaabaha badan ee ay ugu qalmi karaan SNAP maadaama ka-dhaafitaanada caadiga ahi ay sii socon doonaan. [Waxaad macluumaad dheeri ah ka heli kartaa halkan.](#)

## 2. Maxaan sameeyaa hadda si aan u diyaargarobo?

Waxyaabaha ugu muhiimsan ee aad hadda samayn karto si aad u diyaargarowdo waa:

- Inaad cusbooneysiiso macluumaadkaaga xiriirka
- Inaad eegto boostadaada oo aad ka jawaabto codsiyada

### Cusbooneysiinta macluumaadkaaga xiriirka

Fadlan nala soo socodsii isla markaaba marka ciwaankaaga, iimaylkaaga, teleefankaaga guriga ama teleefankaaga gacanta, dakhligaaga, ama macluumaadka qoyskaagu isbeddelo si aad u hesho farriimaha muhiimka ah ee ku saabsan faa'iidooyinkaaga. Waxaad sidoo kale isu diiwaangelin kartaa ogeysiisyada elegtaroonikada ah si ay kuugu fududaato in aad macluumaad naga hesho.

Waxaa jira siyaabo badan oo aad ku cusbooneysiin karto macluumaadkaaga xiriirka:

### Onlayn ka ah [benefits.oregon.gov](https://benefits.oregon.gov)

- Samee akoon ama soo gal akoonkaagi ONE ee aad horay u isticmaali jirtay
- Waxaa lagu heli karaa luuqada Ingiriiska iyo Isbaanishka



### **Adigoo la xiriirayo La-hawlgale Bulsheed oo ay OHP Shatiyeysay:**

- Haddii aad xubin ka tahay OHP ama MSP, waxaad sidoo kale codsan kartaa in la-hawlgale bulsheed oo OHP shatiyeysay oo jooga aaggaaga uu cusboonaysiiyo macluumaadkaaga xiriirka. Mid ka hel barta [OregonHealthCare.gov/GetHelp](https://OregonHealthCare.gov/GetHelp). Adeegani waa bilaash.
- [Akhriso wax dheeri ah oo ku saabsan sida isbeddelada loogu soo sheego OHP](#)

### **Adigoo la xidhiidhaya Ururadaada Daryeelka Isku-dubaridan:**

- Haddii aad ka diiwaangashan tahay Ururka Daryeelka Isku-dubaridan (CCO), waxaad cusboonaysiin kartaa macluumaadkaaga adigoo u marayo CCO-gaaga. Booqo [bit.ly/ccoplans](https://bit.ly/ccoplans) si aad u hesho lambarada telefoonka CCO.

### **Taleefoon ahaan**

- Xarunta Adeegga Macmiilka
  - 1-800-699-9075 (TTY 711)
  - Isniinta ilaa Jimcaha, 7-da subaxnimo ilaa 6-da fiidnimo, waqtiga Baasifigga
  - Turjubaano ayaa la heli karaa. Waxa kale oo aad heli kartaa turjumaan ku hadla luqadda aad doorbidayso ka hor intaadan la hadlin shaqaalaha. Lambar bilaash lagu waco ka hel [halkan](#).
- La-hawlgalayaasha Bulshada Deegaanka. Booqo [bit.ly/ohplocalhelp](https://bit.ly/ohplocalhelp) si aad u hesho La-hawlgalayaasha Bulshada ee shatiga ay siisay OHP.

### **Si fool-ka-fool ah**

- Xafiis kasta oo kamid ah xafiisyada ku yaalo Oregon ee Waayeelka iyo Dadka Naafanimada qaba ama Barnaamijyada Isku-filanaanshaha, iyo qaar ka mid ah xafiisyada Wakaaladda Waayeelka, kuwaasi oo inta badan loo yaqaan xafiisyada Adeegyada Waayeelka iyo Naafada:
  - Ka raadi goobaha iyo lambarada taleefanka barta [www.oregon.gov/dhs/offices/pages/one-services.aspx](https://www.oregon.gov/dhs/offices/pages/one-services.aspx)
  - Fadlan wac ka hor intaadan xafiis tagin.
  - Turjubaano ayaa la heli karaa.

## **3. Maxaan samayn karaa si aan u sii haysto faa'iidooyinkayga?**

Waxaa laga yaabaa inaad boostada ku hesho ogeysiis kuu sheegaya tallaabooyinka aad qaadayso si aad u sii haysto faa'iidooyinkaaga. Isla markaaba ka jawaab codsiyada. Dhammaan dadka qaata faa'iidooyinka ma wada heli doonaan ogeysiisyo.



Dadka qaar ayaa laga yaabaa inay helaan faa'iidooyin yar ama aysan mar dambe heli doonin wax faa'iidooyin ah. Haddii taasi dhacdo, waxaanu wadaagi doonaa macluumaad ku saabsan agabyada kale ee ku caawin kara. Tusaalooyinka qaar ayaa hoos ku yaalo.

## **OHP iyo MSP**

Waxaad haysan doontaa ilaa 90 maalmood oo aad ku buuxiso foomkaaga cusboonaysiinta ee OHP iyo MSP, haddii lagu soo diro. Haddii aadan dib dambe ugu qalmin faa'iidooyinka, waxaad heli doontaa ogeysiis 60 maalmood ah ka hor intaysan dhammaan faa'iidooyinkaagu.

Haddii aadan dib dambe ugu qalmin OHP iyo/ama MSP, waxaanu kula wadaagi doonaa macluumaad ku saabsan xulashooyinka kale ee loogu talagalay caymiska caafimaadka. Hadafkayagu waa inaan kugu xidhno xulashooyinka kale ee caymiska caafimaadka. Waxaa dhici karta inaad awooddo inaad caymis caafimaad oo wata caawimo dhaqaale ka hesho Suuqa Caymiska Caafimaadka Oregon. Dadka aanan dib dambe ugu qalmin faa'iidooyinka OHP waxay u qalmi doonaan xilli diiwaangelin oo qaas ah oo loo marayo Suuqa. Macluumaadka ku saabsan xulashooyinkan waxa boostada loogu diri doonaa shakhsiyaadka aanan dib dambe ugu qalmin OHP.

Haddii aad aaminsantahay inaad si khalad ah ku heshay ogaysiiska joojinta, fadlan ODHS ka wac 1-800-699-9075. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan xulashooyinka kale ee caymiska, fadlan wac Xarunta Caawinta Kala-gudubka Suuqa adigoo adeegsanayo lambarka 1-833-699-6850 (lacag-la'aan). Waxaad sidoo kale caawimaadka caymiska caafimaadka oo bilaash ah ka heli kartaa [OregonHealthCare.gov/GetHelp](https://OregonHealthCare.gov/GetHelp).

Waxaad la xiriiri kartaa lataliyaha MSP adiga oo adeegsanayo barnaamijka [Kaalmada Faa'iidooyinka Caymiska Caafimaadka ee Waayeelka \(SHIBA\)](#) ee Oregon

## **Adeegyada iyo taageerada loogu talagalay dadka qaba naafanimada iyo dadka waayeelka ah**

Haddii aad hesho adeegyo iyo taageerooyin oo aadan mar dambe u qalmin, waxaa laga yaabaa inay jiraan agabyo/khayraadyo bulsheed oo ku caawin kara.

- Kala hadal maamulaha kiiskaaga si aad kaalmo dheeraad ah u hesho.
- La xiriir [Isku-xiraha Khayraadka Waayeelka iyo Naafada](#) adigoo adeegsanayo 1-855-ORE-ARDC (637-2372)
- La xiriir lataliyaha Medicare adiga oo adeegsanayo barnaamijka [Kaalmada Faa'iidooyinka Caymiska Caafimaadka ee Waayeelka \(SHIBA\)](#) ee Oregon
- limaylka odds.fieldliaison@odhsosha.oregon.gov





- Weydii [Barnaamijka Naafanimada Koriinka ee Bulshadaada](#) wax ku saabsan [adeegyada naafanimada garaadka iyo korriinka.](#)

### **Faa'iidooyinka cuntada ee SNAP**

Haddii hoos u dhac ku yimaado faa'iidooyinka cuntada, waxaa jiri kara khayraadyo bulsheed oo ku caawin kara. Booqo [needfood.oregon.gov](http://needfood.oregon.gov) si aad u hesho khayraadyada cuntada ee kajira bulshadaada.

## **4. Waa maxay Gurmada Caafimaadka Dadweynaha?**

Billowgii 2020, Maraykanku wuxuu ku dhawaaqay Gurmada Caafimaadka Dadweynaha (PHE) sababtuna waxay ahayd cudurka COVID-19 ee faafayay.

Gurmada Caafimaadka Dadweynaha ee COVID-19 ee faderaalka wuxuu keenay dabacsanaan sharci iyo maalgelin dheeri ah oo loogu talagalay faa'iidooyin iyo adeeyo ku-meelgaar ah oo la siinayo dadka Oregon.

Dabacsanaanta iyo barnaamijyada waxaa ka mid ahaa caymis joogto ah oo loogu talagalay xubnaha OHP, qaatayaasha barnaamijka Kaydsashada Medicare, iyo dadka hela adeegyada iyo taageerooyinka soconayo muddada-dheer, xitaa haddii dakhligoodu ama baahiyadooda ay isbeddelaan. Waxay sidoo kale keentay faa'iidooyin cunto oo badan iyo xaddidaadyada u-qalmitaanka ee dadka ka qoran SNAP oo yaraaday.

## **5. Goorma ayuu dhammaan doonaa Gurmada COVID-19?**

Oregon waxa ay isu diyaarinaysaa dhamaynta Gurmada COVID-19 ee federaalka, kaas oo lagu wado inuu dhaco 11-ka Maayo, 2023.

Xaaladda Gurmada COVID-19 kala soco barta <https://oregon.gov/covidphe>.

## **6. Sideen u heli karaa macluumaad dheeraad ah?**

Wixii ah macluumaad dheeri ah, booqo [Oregon.gov/covidphe](http://Oregon.gov/covidphe).

